# Suurat Al-Caadiyaat سُورَةُ العَادِيَاتِ

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

وَٱلْعَٰدِيَٰتِ ضَبْحًا ١

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Fardaha Jahaadka u orda iyagoo qaylyi.

فَٱلْمُورِيَٰتِ قَدْحًا ٢

2. iyo kuwa dabka Qoobkooda ku ifiya (guuraha).

فَٱلْمُغِيرَٰتِ صُبْحًا ٣

3. Iyo kuwa Cadawga weerara Subaxdii.

فَأَثَرْنَ بِهِۦ نَقْعًا ٤

4. Ee Boodhka kiciya.

فَوَسَطْنَ بِهِۦ جَمْعًا ٥

5. Cadawgana dhexgala.

إِنَّ ٱلْإِنسَٰنَ لِرَبِّهِۦ لَكَنُودٌ ٦

6. Ee Dadku Eebohood waa diideen.

وَإِنَّهُۥ عَلَىٰ ذَٰلِكَ لَشَهِيدٌ ٧

7. Arrintaasna Dadku wuu ogyahay.

وَإِنَّهُۥ لِحُبِّ ٱلْخَيْرِ لَشَدِيدٌ ٨

8. Dadkuna Xoola jacaylka waa ku daranyahay.

۞ أَفَلَا يَعْلَمُ إِذَا بُعْثِرَ مَا فِى ٱلْقُبُورِ ٩

9. Miyuuna ogayn Marka Xabaalaha waxa ku jira la soo bixiyo.

وَحُصِّلَ مَا فِى ٱلصُّدُورِ ١٠

10. Laabaha waxa ku qarsoonna la muujiyo.

إِنَّ رَبَّهُم بِهِمْ يَوْمَئِذٍ لَّخَبِيرٌۢ ١١

11. In Eebohood Maalintaas ogyahay.

Jahaadka Gaaladu waa Arrin wayn oo waajib ah, kaasoo ah in loo darbado wax kasta oo qalab ah, qiimaha arrintaasna waxaa ku tusin in Eebe ku dhaartay.
waxaa kale oy Suuraddu ina tusin Madax adaygga Dadka iyo Xoola jacaylkiisa, marse haddii Qiyaame la iman, Qalbiga wixii ku qarsoonaana la muujin Eebana wax walba ogyahay, soo in loo darbado khayrkana la badiyo ma haboona. Al-Caadiyaat (1-11).